



Shaqo-helidda



Haysashada shaqo waxay kaa caawin doontaa inaad abuurto mustaqbal xoogan.



Markaad timaado waxaa laga yaabaa inaad si toos ah shaqo u helin.



Waxay qaadan kartaa muddo inaad shaqo hesho.




Waxaad la kulmi kartaa loolanada qaarkood oo ah:

- in aadan ku lahayn wax waayo-aragnimo shaqo ah halkan Australia



- inaad si fiican Ingiriisiga ugu hadli karin



- inaadan garanayn cid kaa caawin karta inaad shaqo hesho



- xirfadaha aad haysato uma habboona shaqooyinka Australia



- shahaadooyinka aad haysato lagama aqoonsana halkan Australia



Degitaanka gurigaaga cusub wuxuu noqon karaa:

- mid walaac badan
- taxaddi badan



Xusuusnow: waqti bay qaadanaysaa.



Tallaabooyinka kowaad oo aad u baahan tahay inaad qaado waa:

- barashada Ingiriisiga



- qaadashada Shaqo-helidda kowaad oo lagu siiyo



Wasaaradda Adeegyada Aadanaha waxay (Department of Human Services) leedahay adeegyo taageero oo aad adeegsan karto:

- lacag-bixino si loo caawiyo dadka aan shaqayn ama shaqeeya



- caawimaad inaad shaqo hesho



- caawimaad inaad tababar hesho



Dowladda Australia doonimayso in dadku ku tiirsanaadaan lacag-bixinnada.



Waxay doonaysaa in dadku:

- samaystaan xirfado shaqo
- raadiyaan shaqooyin



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah websiteka Wasaaradda Adeegyada Aadanaha.

www.humanservices.gov.au

Akhlaaqda shaqo ee Australia



Halkan Australia helidda Shaqo-helidda macnaheedu waa wax ka weyn lacag samayn.



Dadka Australia waxay aaminsan yihiin in shaqadu ay tahay qayb muhiim ah ee aqoonsigooda – cidday yihiin.



La-haanshaha akhlaaq shaqo oo wacan waa muhiim markaad shaqo haysato.



Akhlaaqda Shaqo-helidda oo wacan macnahiisu waa inaad:

- u-qabato shaqadaada si taxadar ah
- si fiican u qabato shaqadaada
- wanaag dareento sababtoo ah waxaad wax u qabatay si fiican



Waxaad u baahan kartaa inaad shaqo ku qaadato heer ka hooseeya kan badan ku shaqayn jirtey.

Maahan wax xun ama khalad ah.



Waxay:

- kuu kasbaysaa lacag aad ku caawiso inaad ku daryeesho qoyskaaga



- kuu horseedaysaa shaqo wacan



Halkan Australia ragga iyo haweenka way shaqeeyaan.

Waxaana loola dhaqmaa isku si goobta Shaqo-helidda.

Bixinta canshuuraha



Waxaa laga yaabaa inaad ka shaqayso lacag:

- shaqadaada




- ganacsi aad leedahay



- canshuurta Badeecadaha iyo Adeegyada (Goods and Services Tax - GST)



- dulsaar aad ka heshay lacag kuugu jirta akoonkaaga bangiga



Dowladda Australia waxay qaadataa qaar lacagta aad shaqayso. Taasna waxaa loo yaqaan canshuur.



Waxay ku qarashgaraysaa canshuurta adeegyada sida:

- daryeelka – taageerada la siiyo dadka u baahan



- lacag-bixinta la siiyo aan haysan wax shaqo ah



- waddooyinka



- caafimaadka



Waxaad u baahan tahay Lamabarka Galka Canshuurta (Tax File Number - TFN) oo laga soo qaato Xafiiska Canshuuraha ee Australia (Australian Taxation Office - ATO) haddii aad:



- Lacag ka qaadata shaqo



- Qaadato lacag-bixin dowladda



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan canshuuraha website-ka Xafiiska Canshuuraha ee Australia (Australian Taxation Office - ATO).

www.ato.gov.au

Shaqo-helidda



Helidda Shaqo-helidda waa waxaad u baahan tahay inaad samayso.



Waa mid ka mid ah waxyaalaha ugu muhiimsan oo aad uy baahan tahay inaad samayso markaad timaado Australia.



Waxaad caawimaad u helaysaa inaad shaqo hesho.



Waxaad u baahan tahay inaad da'daal badan geliso:

- raadinta Shaqo-helidda
- shaqo-helidda
- haysashada shaqadaada



Waxaa jira siyaabo kala duwan oo aad ku heli karto shaqo:

- ka codso saaxiibka iyo qoyskiina haddii ay garanayaan wax ku saabsan Shaqo-helidda



- dhagayso talooyinka ay Centrelink ku siiso oo samee waxay kuu sheegeen

- iska-diiwaangeli

- jobactive

www.jobs.gov.au/jobactive



ama

- adeegyada Shaqo-helidda linta

www.dss.gov.au/our-responsibilities/disability-and-cares/programmes-services/disability-employment-services



- adeegso bogga JobSearch ee Dowladda Australia

www.jobsearch.gov.au



- ka eeg
- wargeysyada



- boodhka ogaysiinta bulshada



- bogga Shaqo-helidda ee intarneedka



- buugta taleefanka



- caawimaad ka hel haya'daha Shaqo-helidda



- folanteeri noqo – samee shaqo aan mushahari ahayn taasoo caawisa bulshada



Folanteerininimadu waxay kaa caawin kartaa:

- yeelashada xirfado



- hel waayo-aragnimo shaqo



- la-kulan dadka kuwaas oo kugu caawin kara inaad shaqo hesho



- is-mashquuli



- umuuji dadka inaad aad u shaqayn karto



- baro sida looga shaqaysto Australia



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan folanteerka website-ka Volunteering Australia.

www.volunteeringaustralia.org

Shahaadooyinka dibadda

Ku-tarjumidda shahaadooyinkaaga Ingiriisiga



Waxaa muhiim ah:

- samee in shahaadooyinkaaga iyo dokumantiyada kale lagu turjumo Ingiriis



- raadi in shahaadooyinkaaga laga aqoonsado Australia



Waxay u fududaynaysaa dadka laga yaabo inay shaqo ku siiyaan si ay u ogaadaan waxaad qaban karto

Waxaad online-ka ku codsan kartaa in dokumantigaaga lagu turjumo adigoo <https://translating.dss.gov.au>



Dokumantigaaga waxaa laguugu turjumi doonaa Ingiriisi kadibna boostada ayaa lagu soo dhigi doonaa



Wax lacag ahna kuuguma kacayso.

Aqoonsiga shahaadooyinkaaga



In la aqoonsado shahaadooyinkaaga waxay ku siin doontaa fursad fiican oo shaqo ku heli kartid adoo qabanaya shaqadii aad sida caadiga ah u samayso.



Shaqooyinka qaarkood waxay kuu ogolaanayaan inaad samayso koorsooyin si aad ugu badesho shahaadooyinkaaga inay gaarsiisnaadaan heerarka Australia.

Kuwaasna waxaa loo yaqaan koorsooyinka kabidda.




Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan in shahaadooyinkaaga la aqoonsado websiteka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka (Department of Education and Training).


www.internationaleducation.gov.au




Aqoonsiga Xirfadleyaasha ee Australia (Trades Recognition Australia - TRA) waxay kugu caawin kartaa haddii aad ka shaqayso mid ka mid ah xirfadahan:



- ingineeringka
- dhismaha



- shaqo-helidda-biraha



- korontada



- khidmaynta



Waxay ku siin karaan shahaadadaada oo lagu aqoonsaday Australia.



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah website-ka Aqoonsiga Xirfadleyaasha ee Australia.

www.tradesrecognitionaustralia.gov.au/

Helidda Shaqo-helidda


Résumeega



Sooyaalkaaga waxbarasho iyo shaqo waa dokuminti ku saabsan:

- adiga iyo ciddaad tahay
- waxay yihiin shaadooyinka aad haysato
- waayo-aragnimadaada – waxaad shaqooyin hore usoo qabatay

Waxaa lagu weydiin doonaa sooyaalkaaga waxbarasho iyo shaqo markii aad soo codsato shaqo.




Sooyaalkaaga waxbarasho iyo shaqo waa in:

- kombiyuutarka lagu teebgareeyaa
- laga hubiyaa wixii khaladaad hikaadin ah



Haddii aadan lahayn waayo-aragnimo shaqo waxyaalo kale ayaad ku qori kartaa resumeegaaga si uu u muujiyo inaad Shaqo-helidda ku wanaagsan tahay.

- shfolanteeri ahaqo



- koorsooyin tababar ma daraasad



- waayo-aragnimooyin nooloeed oo aad soo martay



Adeegyada sida jobactive waxay kaa caawin karaan sooyaalkaaga.


Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan jobactive website-ka Wasaaradda Shaqada iyo Ganacsiga Yaryar (Department of Jobs and Small Business).

www.jobs.gov.au/jobactive

Tegidda Wareysiga



Halkan Australia, waxaa ka jiri kara dad badan oo isku dayaya inay helaan isla hal shaqo.



Ka hor intaadan helin Shaqo-helidda, waxaa lagaa codsan karaa inaad u timaado wareysi.



Wareysigu waa markaad la kulanto dadka aad u shaqayn karto kalana hadal wax ku saabsan Shaqo-helidda.



Waxaad u baahan doontaa inaad ka hadasho:

- waxbarashada



- xirfadahaaga



- waayo-aragnimadaada



- sababta aad tahay qof ku habboon Shaqo-helidda



Dhaqannada qaarkood ma wacna inaad ka hadasho naftaada.



Australia waxaad u baahan doontaa inaad ka hadasho naftaada si aad u hesho Shaqo-helidda.



Markaad ku jirto safarka aad Australia ku aadayso waxaad muujinaysaa:

- adkaysi – waxaad noqon kartaa mid adag markaan howluhu fududayn
- go’aan-qaadasho – si adag ayaad u shaqaysaa si aad u gaarto hadafyadaada



Kuwaani waa astaamo wacan.

Dadka ku siinaya Shaqo-helidda sidaas way ogyihiin.

Markaad Shaqo-helidda hesho



Lahaanshaha akhlaaqda Shaqo-helidda ee wacan waxay kugu caawin doontaa inaad haysato shaqadaada.




Waxaa jira waxyaalo ay tahay inaad xusuusnaato markaad shaqo hesho:

- waqtiga ku imow – ha daahin
- haddii aadan waqtiga ku iman karin, u sheeg dadka aad u shaqayso sida ugu dhaqso badan



Mashquulsanow intaad Shaqo-helidda joogto.

Bareegga qaado markii ay tahay inaad qaadato.



Dhibaatooyinka shaqsiga ee yaryar maahan cudurdaar ka maqnaanshaha Shaqo-helidda.

Keliya ka maqnow Shaqo-helidda haddii aad:

- xanuunsan tahay
- ay wax degdeg ah kugu dhacaan



Weydii su'aalaha haddii aadan fahamsanayn Shaqo-helidda aad u baahan tahay inaad qabato.

Weydii:

- qofka madaxa kuu ah
- shaqaalaha kale



Ka eego dadka kale si aad wax uga barato.



Weydii haddii aad awoodo:

- isku day howlaha cusub
- yeelo masuuliyado cusub ee waxyaalaha aad u baahan tahay inaad qabato ah



La-samayso xiriir wacan dadka aad isla shaqaysaan.

Ka taxadar in aadan waqti badan ku bixin hadal markay tahay inaad shaqayso.

Dadka kale ixtiraam kula dhaqan – sida aad doonayso in laguula dhaqmo.




Waxaad la shaqayn doontaa dad kuwaas oo leh:

- dhaqano kala duwan
- diimo kala duwan
- aragtiyo kala duwan – siday u arkaan adduunka



Ragga iyo haweenka isku si ayaa loogula dhaqmaa goobta-Shaqo-helidda.



Samee diiwaanka shaqo oo wacan – ka shaqee isla shaqo keliya ugu yaraan 6 bilood haddii ay suurtagal tahay.

Sii dadka aad u shaqayso ogaysiin haddii aad qorshaynayso inaad ka tagto shaqadaada.



Ula dhaqan si:

- ixtiraam leh
- xushmad – dabci wanaagsan

Waxay noqon doonaan garsooreyaashaada shaqadaada ku xigta midan waxayna dadka kale usheegi doonaan nooca shaqaale oo aad tahay.

Usheeg Centrelink haddii aad shaqo hesho.

Waa sharci. Shaqo-helidda mushaariga ah waxay saamaynaysaa wixii lacag-bixino ah oo qaadato.

